

**CareerForce iwaa ilo
rasmi ah oo loogu
talagalay
in lagu sahmiyo
xirfadaha
iyo raadinta shaqo ee
gobolka Minnesota**

- » Waxaa heli kara dhammaan dadka degan Minnesota
- » Ka hel caawimaad si toos ah (shaqsi ahaan), wacitaan taleefan, ama khadka tooska ah (online)
- » Waa bilaash



CareerForce iwaa shabakad ballaaran oo ka koobanwada-hawlgalayaal ku baahsan gobolka Minnesota oo u heellan:

- » Inay ka caawiyaan dadka reer Minnesota inay is diyaariyaan oo ay helaan shaqooyin ay ku qanacsanyihiin
- » Inay ka caawiyaan loo-shaqeeyayaasha Minnesota inay helaan shaqaale ay ugu baahan yihiin koritaanka iyo kobocooda

Qof walba waa lagu soo dhaweynayaa inuu ka faa'iidaysto adeegyo badan oo cusub oo hal-abuur leh iyadoo la marayo internetka, taleefoonka iyo In ka badan 50 xarumood oo CareerForce ah oo ku yaal guud ahaan gobolka Minnesota. Waxaad ka heli kartaa xarunta CareerForce ee kuugu dhow adigoo booqanaya CareerForce.MN.gov ama iska baara sawirka hoose.



CareerForce™
Minnesota's Career Resource

651-259-7500

CareerForce@state.mn.us

CareerForce.MN.gov


Marka la codsado, macluumaadkan waxaa lagu heli karaa qaabab kale oo loogu talagalay dadka naafada ah.

Xarumaha CareerForce ee Minnesota waa shaqo-bixiyeyaal iyo adeeg-bixiyeyaal sinnaanta fursadaha shaqo ilaalinaya.

CareerForce waa lammaane sharaf leh oo ka tirsan shabakadda American Job Center.
6-2025

DEED-58068

CareerForce™
Minnesota's Career Resource



**CareerForce waxay kaa
caawin kartaa inaad**

- » Shaqo hesho
- » Sahamiso xulashooyinka xirfadaha
- » Wax ka barato fursadaha tababarka iyo adeegyada taageerada

CareerForce waa il rasmi ah oo gobolka Minnesota u ah sahmintaa xirfadaha iyo shaqo raadinta.



CareerForce waxay kaa caawin kartaa inaad:

- » La xiriirto loo-shaqeeyayaal oo hadda shaqaaleysiinaya
- » Sahamiso fursadaha xirfadeed ee la jaan qaada danahaaga, xirfadahaaga, iyo waayo-aragnimadaada
- » Hagaajiso xirfaddaada shabakad-sameynta iyo istaraatiijiyadda shaqo raadinta
- » Cusbooneysiiso CV-gaaga (resume) oo aad is diyaarsato wareysiyada shaqada
- » Ogaato haddii aad u qalanto kaalmada lacagta waxbarashada ama tababar bilaash ah si laguu diyaariyo shaqo si weyn loo raadinayo
- » Go'aansato haddii aad u qalanto adeegyo kale inta aad shaqo raadineysa



Booq CareerForce.MN.gov si aad u :

- » Hesho macluumaadka xiriirka ee shaqaalaha xarunta CareerForce ee kuugu dhow [CareerForce.MN.gov/locations](https://www.careerforce.mn.gov/locations)
- » Raadiso kumannaan fursado shaqo oo ka banaan Minnesota
- » Hesho macluumaad ku saabsan bandhigyada shaqada iyo munaasabadaha kale ee shaqaaleysiinta ee kugu dhow
- » Ka qaybgal workshop-yo ku saabsan sahmintaa xirfadaha ama raadinta shaqada
- » Qaado qiimeyn xiisaahaada si aad u aragto xirfadaha kugu habboon
- » Qaado qiimeyn xirfadeed si aad u ogaato sida xirfadahaaga hadda u jaanqaadaan shaqooyinka si weyn loo raadinayo
- » Ka hel fursado tababar bilaash ah, talooyin ku saabsan resume-ga iyo wareysiyada, sahmintaa xirfado kala duwan — iyo waxyaabo kale oo badan!